

Tiibisho jiifta, warbixin bukaan (2016-09-19)

Goorta aan daweyn ka hortag ah la bixineynin.

Warqadda warbixinta ee dhakhaatiirta ka gaashaamashada cudurrada faafa.

Sidee qofku ku noqdaa mid la qaadsiiyay?

Bakteeriyada tiibishadu waxaa ay ku faaftaa hawada iyadoo qof ka imaanaysa qofna geleysa. Taasi waxaa ay dhici kartaa marka kan xanuunsan oo wax qaadsiin kara uu qufaco, dadka agtiisa joogana ay neef ahaan u tiitaan bakteeriyada.

Waa maxay tiibisho jiifta?

Dadka la qaadsiiyo oo dhan ma ku xanuunsadaan tiibiisho. Dadka badankooda awooddooda difaaca jirka ayaa joojin karta koritaanka bakteeriyada. Bakteeriyadu jirka way iskaga jiri kartaa iyada oo aan firfircooneyn. Xaaladdan ayaa loogu yeeraa **tiibisho jiifta**.

Tiibisho jiifta maaha wax cudur ah.

Adigaaga baaritaan dhiig ka dib (tijaabada IGRA) ama tijaabo maqaar (tijaabo tiibisho) helay jawaab ah in aad qabtid tiibisho jiifta **si buuxda ayaad u caafimaad qabtaa**, dad kalana kuma faafin kartid bakteeriyada. Waxaase jirta khatar ah in waqti dambe oo nolosha ka mid ah ay isu beddeli karto cudur tiibisho, laakiin khatartaasi waa ay yartahay. Sidaas darteed badanaa looma baahdo in la siiyo wax daweyn ah kuwa qaba tiibishada jiifta.

Daweyn ka hor tag mararka qaar waa la bixiyaa

Dadka qaar ee khatarta ugu jira in ay waqti dambe ku xanuunsadaan ayaa caadi ahaan la siiyaa daweyn ka hor tag ah. Marka ugu horreysa taas waxaa ay khuseysaa carruurta iyo dhallinyarada, marka uur la leeyahay iyo dhalidda ka dib iyo dadka leh difaac jir oo liita, tusaale ahaan marka kansar leyska daweyyo, dadka sokorta qaba ee insuliinka lagu daweyyo, cudurro kilyo oo adag. Daweyn ka hor tag ah waxaa mararka qaar la siiyaa xitaa dadka dhawaan la qaadsiiyay tiibishada.

Xiriir dhakhtar

Haddii mustaqbalka uu kugu dhaco qufac daba dheeraada (seddax usbuuc in ka badan), dhidid habeenkii ah, feebaro ama si aadan dooneneynin uu miisaankaagu hoos ugu dhaco, waa in aad la xiriirtaa dhakhtar si tiibisho lagaaga baaro. Dhakhtar ayaad xitaa la xiriireysaa haddii aad uur yeelatid, ama aad qabtid kaadi macaan lagu daweyyo insuliin, cudur xun oo kilyaha ah, kansar daweyn ama uu sabab kale awgeed difaaca jirkaagu hooseeyo. Xaaladaha nuucaas ah haddii ay jiraan waxaa jirta khatar sarreysa oo ah in aad tiibishada ku xanuunsatid.